



Faahfaahin dheeraad ee ku saabsan guryenta soo boogo  
[www.nashville.gov/mdha](http://www.nashville.gov/mdha)



Metropolitan Development and  
Housing Agency  
701 South Sixth Street  
Nashville, TN 37206

# XAFIISKA SINAANTA EE GURYEYNTA



*Metropolitan Development and Housing Agency*



*Nashville, TN*



## **Xaqsoorka Guryeynta waa Xaqaaga Madiniga ah**

**Q**odobka VIII ee Sharciga Xuquuqda Madiniga wuxuu siinayaa qof kasta oo nool Amerika inuu helo sinaan xagga guryaha oo ka ilaalineysa midab takoor dhinaca guryenta, deymaha, qiimeynta guryaha, caymiska iyo gelintaankaba.

Sinaanta ama xaqsoorka dhinca guryaha macnaheedu waa inaad si xor ah u dooratid meeshii aad ku noolaan lahayd iyada oo aan lagu cunsurin dhinaca jinsiyadda, midabka, dheddig/lab, diinta, asalka qofka, xaaladda qoyska ama naafanimi.

## **Sidee ayaa Ha'aydani kuu Caawin kartaa**

**M**aadama ay cunsirinimada guryeynta ay qofka noloshiisa baa'bin karto, cawqqib xumona ku reebi karto, Hay'adda MDHA waxaa ka go'an inay barto dadka deggen Nashville/Davidson Xuquuqda madaniga ee Sinaanta Xagga Guryaha. Xafiiska hay'adda Horumarinta iyo Guryaha ee Nawaaxiga Nashville u qaabilson dhinaca sinaantu wuxuu qabta kulamo tacliimeed oo ku wajahan in la baro dadka deggen guryaha iyo kuwa bixiya guryaha xuquuqdooda iyo waajibaadka ee hoos yimaada Xeerka Federaaliga ee Sinaanta Guryaha. Xafiiska Sinaanta Guryaha wuxuu kaala talinayaa wixii aad xaq u leedahay iyo wixii adiga waajibaad ah ee laga rabo iyo waliba wuxuu kuu sheegaya dariiqooyinka sharciga ah ee aad u mari lahayd. Waxaan si dhow ula shaqaynaa una gudbinnaa cabashooyinka dhinaca cunsirinimada guryenta hay'adaha ku xeel dheer xagga sinaanta guryaha oo baaritaan ku sameeya ama hubiya in cabashooyinkaas.

Ujeedada Xafiiska Sinaanka Guryaha waa inuu la dagaalamo wixii xaq darro ee ka yimaada xagga guryeynta isagoo ku baraarujineya dadka deggen Nashville/Davidson xuquuqdooda madaniga ah ee sinaanta guryaha.

## **Tusaale waxyaabaha ku tusinayaa cunsuriyad xagga guryaha**

- “Waa ka xunahay, guriga waa la kireystay markii aad soo wacday kadib.”
- “Ma hubtaa inaad awoodi kartid inaad deggetid xaafaddan?”
- “Haddii aad sawirka qoyskaaga qararisid, waxa laga yaaba in guriga dhaqso loo gato.”
- “Waa ka xumahay, guriga waxaa lagu kireynayaa sida uu yahay waxba laga haagajin mayo.”
- “Haa, waa ku tusayaa guriga, kadib markaan arko sharcigaaga dalka (Green Card).”
- “Af-Ingiriisi ma ku hadasha?”  
“Waa ka xumahay, waxaan u baahanahay inaan kula hadli karo!”

Haddii aad maqashay hadaladan oo kale, waxaa laga yaaba in lagu gafee. Na soo wac si aad wax uga ogaato xuquuqdaada iyo sidii aad u gudbin lahayd dacwad arrainta ku saabsan.

## **Hay'adda Horumarinta & Guryaha**

**615.252.8535**

## **Haddii aad aaminsantahay in cunsurinimo lagula kacay oo aad rabtid inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo la xiriira xuquuqdaada Sinaanta Guryaha, waxaa la xiriiri karta oo kaalmo weydiisan karta:**

**Wasaaradda Guryaha iyo Horumarinta  
Deegaanka  
U.S. Department of Housing and Urban  
Development  
Five Points Plaza  
40 Marietta Street, 16th Floor  
Atlanta, GA 30303-2808  
Tel: (800) 440-8091  
TTY: (404) 730-2654**

**Hay'adda Horumarinta iyo Guryaha ee  
Nawaaxiga Nashville/Xafiiska Sinaanta  
Guryaha  
PO Box 846  
Nashville, TN 37202  
Tel: (615) 252-8535  
TTY: (615) 252-8599**

**Hay'adda Xuquuqda Aadanaha ee  
Tennessee  
Tennessee Human Rights Commission  
531 Henley Street  
Room 701  
Knoxville, TN 37902  
Tel: (865) 594-6500**

**Golaha Sinaanta Guryaha ee Tennessee  
Tennessee Fair Housing Council  
107 Music City Circle, Suite 318  
Nashville, TN 37214  
Tel: (615) 874 -2344**